



Macluumaadka logu talagalay Bulshooyinka Dhaqamada Badan

XARUNTA CAAFIMAADKA DHIMIRKA EE DHAQAMADA KALA-DUWAN EE QUEENSLAND (QTMHC)

Adeegga Qabatinka iyo Caafimaadka Dhimirka ee Metro South (MSAMHS)

Kumaan nahay:

Waxaanu nahay adeeg takhasus ah oo dowlad-goboleedka oo dhan ka shaqeeya si loo hubiyo in dadka ka soo jeeda asalada dhaqameedka kala duwan inay helaan daryeelka iyo taageerada caafimaadka dhimirka oo saxda ah iyo in adeegyada ay helaan ku habboon tahay baahidooda shakhsi ahaaneed.

Qarashka:

Wax qarash ah ma jiro

Meelaha Qaadashada:

Dhammaan goobaha Queensland

Yaan la shaqeynaa:

- dadka ka soo jeeda asalada dhaqamada iyo luqadaha kala duwan
- dadka da' walba leh
- dadka la kulma dhibaatooyin shucuureed, bulshadeed ama maskaxeed
- xubnaha qoyska oo leh dadka qaba dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka oo helaya daryeelka iyo taageerada caafimaadka dhimirka
- bixiyayaasha adeegga ee ku lug leh daryeelka iyo daaweynta dadka qaba dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka
- Kooxaha bulshada dhaqameed si ay uga caawiyaan hagaajinta fahamka ku saabsan caafimaadka dhimirka iyo samaqabka iyo adeegyada la heli karo.

Ogolaanshaha:

Oggolaanshaha qofka ka ay soo wajahay dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka waa inaan helnaa si aan si toos ah ula shaqeyno qofka. Ogolaanshaha qofka ayaa sidoo kale lagama maarmaan ah haddii nala ka codsado inan la shaqeyno xubnaha qoyska. Haddii qofku khatar ku yahay naftiisa ama dadka kale, qiimeynta waa la siin karaa iyadoon oggolaansho la helin ayadoo lo marayo Xeerka Caafimaadka dhimirka ee 2016.



Waxaan qabano:

- Waxaan dooneynaa inaan fahamno sharaxaadda dhaqameed (oo ay ku jirto diinta) iyo saameynta dhaqanka ee dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka. Tani waxay caawinaysaa rugaha caafimaadka dhimirka marka go'aan laga gaarayo daaweynta iyo daryeelka.
- Waxaan siinaa macluumaad ku saabsan caafimaadka dhimirka shakhsiyaadka iyo xubnaha qoyska si ay uga caawiso inay si fiican u fahmaan xanuunkooda iyo sida wax looga qaban karo.
- Waxaan tababarna oo qalab siinaa folanteerada ee kooxaha bulshada dhaqameed si ay uga caawiyaan inay wax ka qabtaan cudada ku saabsan jirada dhimirka iyo is-daldalidda, kor u qaadida xirfadaha si ay ula qabsadaan walaaciyeyaasha lagu habaynayo dhaqanka cusub, iyo in la hagaajiyo aqoonta ku saabsan adeegyada caafimaadka dhimirka.
- Waxaan qabanaa kulamada waxbarashada bulshadeed oo ku saabsan jirada dhimirka iyo mawduucyada samaqabka, tus. sida ay hoggaamiyeyaasha bulshadu uga gacan gaysan karaan inay dadku si fiican ugu xirmaan adeegyada.
- Waxaan horumarinaa oo wadaagnaa macluumaadka ku saabsan caafimaadka dhimirka iyo samaqabka oo ku qoran luuqado badan.

Maxaa na dhigaya inaan si dhaqameed ah wax u qabano?

Waxaan leenahay shaqaale dhaqameed oo ka kala socda in ka badan 160 kooxood oo dhaqan iyo luqadoba ku kala duwan. Waxaanu la xiriirnaa shaqaalahan adeeg bixiyayaasha caafimaadka dhimirka si ay uga caawiyaan inay u sheegaan daryeelka caafimaadka dhimirka.

Nala soo xiriir:

Qof kasta ayaa loo soo gudbin karaa QTMHC (oo ay ku jiraan shakhsiyaadka, xubnaha qoyska, ama bixiyeyaasha adeegga)

Taleefan: (07) 3317 1234 AMA 1800 188 189 (Dibadda Brisbane goobaha Magaalooyinka-waaweyn)

Saacadaha shaqada: Isniinta ilaa Jimcaha 8:30 subaxnimo illaa 4:30 galabnimo

Cinwaanka: Level 2, 228 Logan Road Woolloongabba QLD 4102

Email: QTMHC@health.qld.gov.au

Website: <https://metrosouth.health.qld.gov.au/qtmhc>